## Waxaan talaalka TB da (BCG) ku qaatay wadankaygii hooyo. Wali ma igu dhici karaa TB?




Dadka qaatay talaalka TB ayaa wali qaadi kara TB.

Difaaca talaalka TB **ayaa dhamaada muddo kadib**.

Xataa haddii aad talaalka qaadato, dhiiga sheegaaya inaad qabto ayaa ka dhigan inaad qabto qaaxada aan muuqan (LTBI).

Qaadashada **daawada LTBI** ayaa **kaa difaacaysa TB kacsan**.

## Qabista LTBI dib ma u dhigaysaa codsigayga socdaalka?

Cunista daawada LTIBI **MA** gaabinayso codsigaaga.

Dhakhtarkaaga socdaaka ayaa u sheegaaya waaxdaada caafimaadka inaad qabto LTBI.

Waaxda caafimaadka maxaliga ah ayaa kula soo xiriiri karta si ay kuu taageerto.

Haddii aad u baahan tahay in lagaa caawiyo helitaanka dhakhtar kuu dalbi kara daawadaada LTBI, wac waaxda caafimaadka maxaliga ah:

**Degmada:** ______________________

**Lambarka Taleefonka:** ______________________

Aafada Caabuqyada Faafa, Kahortaga iyo Xakamaynta
PO Box 64975, St. Paul, MN 55164
651-201-5414 ama 1-877-676-5414
www.health.state.mn.us

1/2024

# Maxay iiga dhigan tahay inaan qabo qaaxada aan muuqan (LTBI)?



**Waad iska dawayn kartaa LTBI oo waad ka ilaalin kartaa in adiga iyo ehelkaagu la xanuunsataan.**

DEPARTMENT OF HEALTH

Waxaa lagu dhaqan gashay ogolaanshaha Ururka Xakamaynta Xanuunka Qaaxada ee California.

## WAA MAXAY LTBI?
## Sidee ayaan ku qaadayaa cudurka?

LTBI waa caabuq ku jira jeermisyada TB kuwaasoo qarsoon (ama hurda) kuna jira jirkaaga.

Waxaad LTBI ka qaadday **inuu kugu neefsado** qof la xanuunsan cudurka TB.


Wali waad qabi kartaa LTBI xataa haddii aad qaadatay talaalka TB.

## Waxaa jira farqiyo badan oo u dhexeeya LTBI iyo TB kacsan:

| Qofka qaba **LTBI**: | Qofka qaba **TB kacsan**: |
|---|---|
| Ma dareemo xanuun | Wuu xanuunsanaan karaa |
| Raajada xabadka ayaan dhibaato sheegayn | Waxaa laga yaabaa inaan raajada xabadku cilad sheegin |
| **Kuma faafin karo jeermisyada TB** dadka kale | **Wuu ku faafin karaa jeermisyada TB** dadka kale |
| Daawaynta ayaa kahortagi karta TB kacsan | Daawaynta ayaa dawayn karta TB kacsan |
| Daawaynta ayaa ah mid gaaban **(sadex ilaa afar bilbood)** oo fudud | Daawaynta ayaa dheer **(lix ilaa 12 bilood ama ka badan)** |

## Maxaan u qaadanayaa daawada LTBI?

Haddii aadan cunin daawada LTBI, waxay noqon kartaa TB kacsan.




TB kacsan waa **cudur daran** kaas oo aad xanuun xun ka qaadi karto.



**Nus kamid ah** dadka qaba TB da kacsan **ayaa isbitaal la dhigaa.**

**5%**

kamid ah dadka qaba TB kacsan **ayaa u dhinta cudurka.**

## Sidee ayaan ku helayaa daawada LTBI?

**Waydii dhakhtarka socdaalka haddii uu kuu dalbi karo** daawada.

Haddii uusan dalbi karin, **u tag dhakhtarkaaga caadiga ah oo ka codso inuu daawada** kuu dalbo. Soo qaado warqada dhiiga lagaaga baaray.

Waxaad la xiriiri kartaa waaxdaada maxaliga ah si laguugu xiro rugta caafimaadka ee ku dawaynaysa.

**Haddii aadan daawada qaadan, waxaad leedahay fursada hal kamid ah toban** oo ah in LTBI gaagu noqdo TB kacsan.

**Ka difaac naftaada inaad qaado TB kacsan aadna ku faafiso ehelkaaga.**